OGOW XAQUUQDAADA: MAMNUUCIDA MUSLIMIINTA

Hay'adda International Refugee Assistance Project (IRAP), waxay bixisaa caawimaad bilaash ah xagga sharciga dadka qaxootiga iyo dadka kale oo soo barakacay. IRAP kama tirsano dowladda Mareykanka ama hay'adda IOM-ta. Tilmaamahan ayaa bixiyo macluumaadka guud ahaneed. Ujeedada ma ahan talo bixinta dhinaca sharciga ku saabsan codsiyada shaqsiyadeed.

Macluumaadkaan waxaa dib loo eegay bishii todobaad sanadka hadda an ku jirno(July 2019). Shuruudaha way is beddali karaan.

Waa maxay Mamnuucidda Muslimku?

"Mamnuucidda Muslimiinta" waa amarkii Madaxweyne Donald Trump u ku soo rogay dadka Musliminta ah oo ka soo jeedo dalalka Musliminta qaar ka mid ah ayaa laga mamnuucay soo gelitaanka wadanka Mareykanka. Madaxweynaha wuxuu soo saaray Nooca mamnuucida hadda taagan ee Bayaanka Madaxweynaha u ansixiyay bishii Sebtember 24, 2017.

Aniga miyu iga mamnuucay "Muslim Ban-ka" soo gelitaan keeyga wadanka Mareykanka?

Waa lagaa mamnuuci haddii aad tahay muwaadin u dhashay wadanka Iraan, Liibiya, Soomaaliya, Syria, iyo Yemen oo ka baxsan wadanka Mareykanka, adigoo doonaya inaad u soo safarto wadanka Mareykanka, oo aadan horey u haysan sharciga fiisaha lagu soo galo wadanka.

Mawaadinka u dhashay wadamada iyo noocyaha fiisaha laga mamnuucay in lagu soo galo wadanka waxaa ka mid ah:

Wadanka	**Coonyada Fiisaha la Mamnuucay**
Iraan	Dhammaan fiisooyinka dadka shisheeyaha ah iyo kuwa an eheen, marka laga reebo fiisooyinka ardayga wax barashada ku soo galo (F&M) iyo fiisooyinka soogalootiga isweydaarsiga (J).
Liibiya	Dhammaan fiisooyinka dadka shisheeyaha ah iyo ganacsatada (B-1), dalxiiska (B-2), iyo ganacsiga/ dalxiiska (B-1 / B-2) fiisooyinkooda
Soomaaliya	Dhamaan fiisaha shisheeyaha
Syria	Dhammaan dadka shisheeyaha iyo kuwa an shisheeyaha eheen fiisooyin kooda
Yemen	Dhammaan fiisaha dadka shisheeyaha ah iyo kuwa ganacsatada (B-1), dalxiiska (B-2), iyo ganacsiga/ dalxiiska (B-1 / B-2) fiisooyinkooda

- “Fiisaha dadka shisheeyaha” wuxuu u ogolyahay dadka in ay ku noolaadan wadanka Mareykanka ilaa iyo cumrigooda inta ka dhiman. Mamnuucida ma quseyso dadka qaxootiga, sababtoo ah fiiso maku safraan.
- “Fiisaha Dadka Shisheeyaha aan eheen” wuxuu u ogolyahay dadka inay ku soo galaan wadanka Mareykanka ay ku jogaan si ku-meelgaar ah, sida ardayda wax barashada u timaado ama dadka booqashada u yimaado.

Intaas waxa raacsan, fiisaha muwaadiniinta u dhasheen wadamada North Korea iyo Venezuela waxay la kulmaan xannibaadyo u gaar ah.

Mamnuuciddu kuma khusayso haddii:

- Aad tahay qof haysto karaka ku deganaashaha loo yaqaano (Green Card-ka loogu talagalay qofkii hayato inuu ku noolaan karo wadanka Mareykanka ilaa iyo cumrigiisa);
- Aad tahay qof u dhashay laba meel oo ku safrayo baasaboor aan ku jirin wadamada la mamnuucay;
- Waxaad haysataa kaarka aqoonsiga qaxooti nimada ama aqoonsiga magangalyada, dadka an la masaafurin Karin, si sharaf leh lagu sii-daayay, aad ka mid tahay dadka ku joogo sharciga ilaalinta dhinaca nabad gelyada
- Waxaa lagu oggolaaday ama lagu fasaxay xiliga/kadib markii xanibaada Muslimiinta la dhaqan geliyay;
- Waxaa haysataa dukumenti aan ka ahayn fiiso - sida waraaqada gaadiidka lagu raaco, warqada diyaarada lagu raaco oo sax ah, ama dukumiintiga lagugu siidaayay - oo sax ah lagu siyay xiliga/kadib markii xanibaada Muslimiinta u dhaqan galay, taaso kuu oggolaanayso inaad u safri kartid wadanka Mareykanka oo aad ku raadsan karto ogolaansho ku so gelitaanka.

Ma jirtaa waddo aniga aan ku aado wadanka Mareykanka haddii xanibaada lagu soo rogay Musliminta ay iga mamnuucday?

Waxaad weydiisan kartaa in laga dhaafo xayiraada.

Si laguu ogolaado dhaafida, waa inaad dowladda Mareykanka tusta inaad la kulmi kartid "dhibaato aad u adag" inaadan usoo safri karin wadanka Mareykanka, inaadan wax dhibaata u keeni Karin dalka, iyo soo gelitaankaada wa inuu yahay “dan guud”.

Dowladda Mareykanka waxay bixisay tusaalooyin qaar oo ah markay ku haboon tahay in laga dhaafi karo qofka xanibaada.

- Waxaad dooneysaa inaad booqato ama aad la noolaato qof xubin qoyskaaga ka mid ah oo ku nool wadanka Mareykanka oo aan laguu oggoleen in aad aado, taasina ay dhaawac ay ogu sugan tahay qofkaas ku nool wadanka Mareykanka;

- Horey waxaad ku nooleyd wadanka Mareykanka ilaa iyo mudo dheer si aad wax u barato ama uga shaqeysato, ama howlo kale, waxaad dooneysaa inaad mar labaad soo aado wadanka Mareykanka isla sababo kale, marka haddii lagu diidona ay dhibaato uga sugan tahay howshaas ama waxqabadkasa;
- Waxad dooneysaa inaad aado wadanka Mareykanka, aad u aado howl ganacsi oo muhiim ah, waajibaadka xirfadaha, kadib haddii aad aadi weyso dhibaato ayay u tahay xirfafahaas iyo ganacsigaas.
- Adigu waxaa tahay cunug yar, ama qof lasoo korsaday;
- Waxad u baahan tahay daryeelka caafimaad ka oo deg-dega ah;
- Waxaa u shaqeeysay dawladda Mareykanka, kadib dowladda aya ku cadaysay inaad tahay qof aaminaad ah oo shaqo qiimo leh u qabtay dowladda.
- Waxaad tahay qof haysto sharciga degnaashaha wadanka Kanada, oo ka dalbaday fiiso meel ka mid ah gudaha wadanka Kanada;
- Waxad u safraysaa ulajeedooyin oo la xiriira dowladda Mareykanka ama arrimo ku saabsan ururka caalami ah.

Ma haystaa wax aan ka walwalo haddii aanan ahayn qof waddani aanan ka mid aheen waddammada la mamnuucay ama aanan rabin inaan ku galo noocyada fiisooyinka laga mamnuucay in lagu soo galo?

Waa inaad ogaataa in xitaa haddii Xanibaada Musliminta uusan kaa mamnuucin soo gelitaankaaga, fiisahaaga ayaa laga yaabaa inuu qaato muddo dheer oo ka duwan sidii horey u ahaan jiray. Xanibaada waxaa u dheer, go'aanka mamnuucida wuxuu ku soo rogay baaritaan dheeri ah iyo kala shaandheyn lagu samaynayo dadka ka kasoo jeedo wadamada Iraq iyo Somalia oo rabo inay ku soo galaan fiisaha ku meel gaarka ah, iyo dadka Iranian-ta ah doonaya inay ku safraya F, M, iyo fiisayaasha J.

Sidoo kale waainaad ogaataa xuquuqda aad ku leedahay garoonka diyaaradaha markaad timaado Mareykanka iyadoo dowladda Mareykanka ay sheeganeyso inay xaq u leedahay inay su'aalo dheeraad ah kugu weydin karaan xaduudka isla markaana ay baaraan alaabtaada. Dib u eeg dukumeentiga hay'adda IRAP ka hadleeyso sharciga Imaatinka garoonka Diyaaradaha ka hor inta aadan safrin.